


Qaad tallaabo si aad dib ugu cusbooneysiiso macaashyada/dheefaha caafimaadkaaga!



Dib-u-cusbooneysiinto ayaa lagu samayn doonaa qorshaha kaarka caafimaadka ee lagu magacaabo Oregon Health Plan (OHP) iyo macaashyada/dheefaha kale ee Medicaid. Qaad tallaabooyinkan:

1. Mar walba cusbooneysii cinwaankaaga.


Cusbooneysii cinwaankaaga ama hel caawimaad bilaash ah.

 Nasoo wac maalmaha shaqo laga bilaabo 7 subaxnimo ilaa 6 galabnimo: **800-699-9075**, Riix lambar 5. U sheeg qofka kaa qabta wicitaanka luqadda aad doorbidayso. Waqtiyada sugitaanku waa kuwa aad u gaaban inta u dhaxaysa saacadaha 7 subaxnimo iyo 8 subaxnimo.

 Waxaad raadsataa xafiis ama bahwadaag qaabbilsan arrimaha bulshada ee kuugu dhow: **KeepCovered.Oregon.gov**

 Kasoo warbixi wixii isbadalo ah kadibna farriimaha dib u cusboonaysiinta uga jawaab qaabka online-ka: **Benefits.Oregon.gov**

2. Mar-kasta ka la soco boostada si waraaqaha la xiriira dib-u-cusboonaysiinta ee lagu soo diro aad u hesho.

 Waxay kuu sheegi doonaan waxyaabaha ay tahay inaad samayso. Diritaanka Waraaqaha ayaa hadda la bilaabay ilaa laga gaarayo bartamaha sannadka 2024. Cid-walba isku mar ma heli doono warqaaqaha.



PS1-G-SO (06/22/2023)



[KeepCovered.Oregon.gov](https://www.KeepCovered.Oregon.gov)

Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, waxaan bixin karnaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. La xiriir lanbarka 503-945-5488 (wicitaanada gudbinta ah oo dhan waa la qabtaa) ama booqo barta Cinwaankeedu yahay feedback@odhsosha.oregon.gov.